Ku: Adiga oo **dugsiga sare dhigta**:

U baahan in laga fekero, haddii aad ku talo jirto inaad waxbarashadaada sii wadato…

Laga bilaabo aqbalida sannad-waxbarashadeed barkiisa ee xilliga dayrta 2010, waxaa hirgeli doono nidaam cusub lagu helo *högskolan*

Laba is-bedel muhim ah oo hirgeli doono laga bilaabo aqbalida sannad-waxbarashadeed barkiisa ee xilliga dayrta 2010

o Waxaad keensan karta dhibicda *meritpoäng* oo ah ilaa 2,5 oo lagu daro *tirada barbardhigga* (qiimaynta dhexdhexaad). *Meritvärde la heli karo waxay noqonaysa* 22,50. Warbixin dheeraad ku saabsan dhibcaha u qalmida waxaad ka heleysa bogga soo socda.
o Waxaa hirgeli doono koox xulan *urvalsgrupp* oo cusub, kooxda toosan *direktgruppen (kooxda I)*, oo *meritvärdet* (*tirada barbardhigga* + dhibcaha u qalmida) halkaso waxbarashada dugsiga sare oo asalka la xisaabinaayo (ku jirin wax dhamaystirid ah). Warbixin dheeraad ku saabsan kooxda *direktgrupp* iyo kooxda dhamaystirida ka akhriso *kompletteringsgrupp (kooxda II) hoos*.

Markii aad dugsiga sare dhiganayso samayso *meritvärde* wanaagsan!

Waa muhim in markii dugsiga sare aad dhiganayso aad samaysato *meritvärde* (tirada barbardhigga + dhibcaha u qalmida) ugu wanaagsan ee la heli karo. Dabcan goor dambe ayaa heli doonta fursad, aad ku dhamaystirto oo aad ku hesho *meritvärde* ka sii wanaagsan, dhamaystirada waxaa lagu samayn kara oo kaliya, kooxda dhamaystirida *kompletteringsgrupp, waa koox xubnaheeda aad ugu tartami doono horyiyaalnimada haddii la barbardhigo kooxda toosan direktgruppen*. Xita ardayga ku mushquulsan dhamaystirida karti u lahaanshada wuxuu ku biira kooxda dhamaystirida *kompletteringsgruppen*.

Dhamaystirida

o Waxaad heli doonta fursad **dhamaystirida lagu helo qiimaha u qalmida ka sii wanaagsan**, laakinse kooxda dhamaystirida *kompletteringsgruppen, waa koox xubnaheeda aad ugu tartami doono horyiyaalnimada haddii la barbardhigo kooxda toosan direktgruppen*.
o Haddii aad ku mashquulsan tahay **dhamaystirida karti u lahaanshada** waxaa lagugu imtixaamaya oo keliya kooxda dhamaystirida. Haddii aad haysato **dhamaystirida tartanka** waxaa lagugu imtixaamaya kooxda toosan (qiimaynta u qalmida ee dugsiga sare ka haysato) iyo kooxda dhamaystirida (qiimaynta u qalmida dhamaystirida kadib). Fiirogaar, dhamaystirida waxay noqon larta dhamaystirida karti u lahaanshada ama dhamaystirida u tartamida hadba waxbarashada aad codsatay.
o Waxaa jiro **dhamaystirida tartanka oo laba nooc ah**: dhamaystirida kala beddelashada iyo dhamaystirida dhibcaha u qalmida. Dhamaystirida kala bedelashada waa markii aad hesho shahaado cusub oo ka sareeyso koorso ku heshay shahaadada gabagabaynta. Makaas shahaadada cusub waxaa lagu xisaabinaya, tirada barbardhigga beddelkii shahaadadii hore. Dhamaystirida dhibcaha u qalmida waxay noqonaysa, kadib markii waxbarashada dugsiga sare aad dhamaysato, oo aad hesho shahaadada ugu hoseeyso ku guulaysaty *Godkänt* koorso lagu helo dhibcaha u qalmida.

Korniinka barnaamijka *Utökat program*

o Koorsooyinka ku tirsan **korniinka barnaamijka** waxaaa la xisaabiyaa oo keliya tirada barbardhigga, waa haddii karti u lahaanshada lagamaarmaan u tahay. Koorso u qalmida ka tirsan korniinka barnaamijka, waxaad xisaabsan karta dhibicyada u qalmida, laakinse shahaadada saamayn kuma yeelato tirada barbardhigga. Agaasimaha dugsiga ayaa go'aan ka gaaro korniinka barnaamijka.

Isboortiga iyo caafimaadka

o Beri hore shahaadada koorsooyinka isboortiga iyo caafimaadka ayaa lagu xisaabin jiray tirada barbardhigga haddii ay ahayd mid karti u lahaanshada lagu helo, iyo/ama sare u qaadida tirada barbardhigga. Sidii beri hore ma aha. Shahaadada koorsooyinka isboortiga iyo caafimaadka
waxaa loo xisaabiya isla sida shahaadada koorsooyinka kale.

Dhibicyada u qalmida – dhibicyada dheeraad ah ka samaysan karto dugsiga sare iyo adigoo dhamaystirid adeegsada

Dhibicyada u qalmida ugu sarayso oo aad heli karto waa 2,5, lagu daro tirada barbardhigga, iyadoo la helo shahaadada ugu hoseeysa ku guulaysatay *Godkänt* iyagoo koorsooyin isku dardarsan sida hadba hoos ku xusan. Waxaad heli karto 4,5 dhibcaha u qalmida, laakinse waxaad ugu badnaantii tirsan karta 2,5.

Koorsooyinka u qalmida
luqada casriga *moderna språk*

Tillaabada 3 ee hal c waxaa lagu hela 0,5 dhibcaha u qalmida iyo tillaabada 4 waxaa lagu hela 0,5 dhibcaha u qalmida oo dheeraad ah. Haddii tillaabada 3 karti u lahaanshada awgeed lagamarmaan ah waxaa lagu hela tillaabada 4 1,0 dhibcaha u qalmida.

Waxaad heli karta 0,5 dhibcaha u qalmida oo dheeraad ah tillaabada 5 luqada markaas aad dhiganayso ama 0,5 dhibcaha u qalmida ugu hoseeyso tillaabada 2 ee hal luqad casri kale. Haddaba ma heli kartid dhibacyo tillaabada 5 iyo tillaabada 2. Waxaad heli karta 0,5 dhibcaha u qalmida ugu hoseeyso tillaabada 2 ee hal luqad casri kale haddii u aad karti u leedahay 1,0 dhibcaha u qalmida luqada koowaad. Koorsooyinka u qalmida luqad casriga, waxaad isku-darkii heli karta 1,5 dhibcaha u qalmida.

Haddii aad haysato shahaadada ugu hooseeyso Waa ku guulaysatay *Godkänt* tillaabada 5 ama ka sii sare, waxaa ku xisaabsan karta 1,5 dhibcaha u qalmida, iyado fiirogaar ah an la sin haddii aad haysato shahaado koorsooyinka ka hooseeya. Haddii aad haysato shahaado *Godkänt* ee ugu hoseeyso tillaabada 4 waxaad xisaabsan karta 1,0 dhibcaha u qalmida iyado fiirogaar ah an la sin haddii aad haysato shahaado tillaabada 3.

Koorsooyinka u qalmida
Af-ingriisi

Af-ingriisi B waxaa lagu hela 0,5 dhibcaha u qalmida iyo Af-ingriisi C waxaa lagu hela oo dheeraad ah 0,5 dhibcaha u qalmida .
Af-ingriisi B karti u lahaanshada awgeed ayaa loo baahan yahay lagu ma helo dhibcaha u qalmida Af-ingriisi B iyo Af-ingriisi C waxaa lagu hela oo keliya 0,5 dhibicyo.

Haddii aad haysato shahaado ku guulaysatay *Godkänt* Af-ingriisi C ee ugu hoseeyso waxaad xisaabsan karta 1,0 dhibcaha u qalmida iyado fiirogaar ah an la sin haddii aad haysato shahaado koorsooyinka hoos yimaada. Tan ma khuseeyso haddii Af-ingriisi B u yahay karti u lahaanshada ku helid. Waxaa xaladaas lagu hela Af-ingriisi C 0,5 dhibcaha u qalmida iyo waxaad buuxinaysa shuruuda karti u lahaanshada.

Koorsooyinka u qalmida
xisaab

Haddii xisaabta ay ka mid tahay shuruuda gaarka karti u lahaanshada waxaa lagu hela, koorso ah heer ka sarsayso koorso karti u lahaanshada lagu helo koorsada 0,5 dhibcaha u qalmida . Koorsada ka sareeyso laba heer tan karti u lahaanshada lagu helo waxaa lagu hela oo dheeraad ah 0,5 dhibcaha u qalmida . Haddii xisaab aysan shuruud ahayn karti u lahaanshada gaar ah waxaa lagu hela koorso B iyo C midkkisa 0,5 dhibicyo. Haddii xisaab D karti u lahaanshada lagu helo, xisaab E oo keliya ayaa lagu hela dhibcaha u qalmida . Haddii xisaab E karti u lahaanshada lagu helo lama heli karo dhibcaha u qalmida xisaabta. Waxaad heli karta ugu badnaantii 1,0 dhibicyo xisaab. Xisaab *diskret* iyo Xisaab *breddning* laguma helo dhibcaha u qalmida.

Koorsooyinka u qalmida oo ah nooca koorsooyinka goobaha

Koorsooyinka goobaha wuxuu ka tirsan yihiin goobaha karti u lahaanshada, iyo khabiir ahaan u barashada maadooyinka oo ka tirsan, laakinse karti u lahaanshada laga helin, waxbarashada aad raadsatay.
Koorsada goobta oo ka kooban 100 dhibicyo, waxaa lagu hela 0,5 dhibcaha u qalmida iyo koorso 50 dhibicyo waxaa lagu hela 0,25 dhibicyo. Waxaad xisaabsanaysa dhibcaha u qalmida, ugu badnaantii laba koorsooyinka goobta haddii 50 dhibacyo midkiiba. Waxaa suurtagal noqon karto inaad xisaabsato laba koorsooyinka *breddning* isla maadada. Koorsooyinka maadada waxaa lagu hela ugu badnaantii 1,0 dhibcaha u qalmida. Fiirogaar koorsooyinka goobta waxaa lagu hela dhibcaha u qalmida, haddii waxbarashada aad codsatay, ay leedahay goobta karti u lahaanshada sida shuruuda karti u lahaanshada. Koorsooyinka maadooyinka luqad casriga, Af-ingriisi iyo Xisaab ma noqon karan koorsooyinka goobta.